

Ma lagu soo damiintey?

- > **Miyaad is-weydiinaysaa in ay shuruudaha damiinashadu runtii ahmiyad leeyihiin?**
- > **Ma waxaad ku talajirtaa in aadan hor iman maxkamadda marka lagaaga yeero?**
- > **Miyaad ku talajirtaa in aad codsato gargaarka sharciyeed (legal aid)?**
- > **Miyaad ku talajirtaa in aad dembiga qiratid?**
- > **Waa kuwan shayo aad u baahan tahay inaad ogaato.**

Miyay kula tahay in shuruudaha damiinashadaadu aysan muhiim ahayn?

Haddii aad ku eekaan weydo shuruudaha damiinashadaada; ama haddii aad iman weydo maxkamadda taariikhda lagu qabtay, **waxaad ku xadgudbaysaa daamiinashada**. Waxay taasi ka dhigan tahay:

- > Waxaa suurogal ah in lagu soo xiro.
- > Waxaa dhici karta in damiinashada lala noqdo.
- > Waxaa dhici karta in xabsi lagugu hayo.
- > Waxaa dhici karta in mustaqbalka lagugu soo deyn waayo damiinasho.

Waxaa waajib kugu ah inaad la soo xiriirtid looyarkaaga.

Haddii aad u iman weydo marka aad kulan la leedahay, waxaa dhici karta inaan si habboon lagu caawin karin.

Gargaarka sharciyeed ma codsanaysaa?

Waa in aad looyarkaaga aragto ka hor taariikhda ugu horraysa ee aad maxkamadda tagayso adigoo wada caddaynta mushaarka/kaalmooyinka. Taas ayaa fududayn doonta in foomamka la buuxiyo dalbashadaadana la deddejiyo.

Haddii aad la dhumato damiinashada

Dembi ayaad gelayaa. Waxay taasi ka dhigan tahay:

- > Warqad lagugu soo xiri karo ayay maxkamaddu soo saari doontaa.
- > Waxaad filan kartaa in lagu ciqaab-mariyo maxaa yeelay 'waad hor iman weydey maxkamadda'.
- > Waxaa dhici karta in ugu dambays xabsi lagugu xukumo maxaa yeelay 'waad hor iman weydey maxkamadda'.
- > Waxaa dhici karta in mustaqbalka lagugu soo deyn waayo damiinasho.

So you got bail?

- > **Wondering if bail conditions really matter?**
- > **Thinking of not turning up at court?**
- > **Thinking of applying for legal aid?**
- > **Thinking of pleading guilty?**
- > **Here are some things you need to know.**

Think your bail conditions don't matter?

If you don't stick to the conditions of your bail; or if you don't turn up at court on the set date, **you are in breach of bail**. This means:

- > You are likely to be arrested.
- > Your bail may be withdrawn.
- > You may be remanded in custody.
- > You may not get bail in the future.

You must keep in touch with your solicitor.

If you don't turn up for meetings with them, they may not be able to help you properly.

Applying for legal aid?

You should see your solicitor before your first court date with proof of wages/benefits. This will help complete the forms and speed up your claim.

If you skip bail

You are committing an offence. This means:

- > A warrant will be issued for your arrest.
- > You can expect to be prosecuted for 'failing to appear'.
- > You may end up with a prison sentence for 'failing to appear'.
- > You may not get bail in the future.

The case may go ahead without you. This means:

- > You can be tried and convicted in your absence – and being absent won't help your case.

Waxaa dhici karta in arrinka la sii wado si kastaba ha noqotee, adigoon joogin. Waxay taasi ka dhigan tahay:

- > Adigoo maqan ayaa maxkamadda lagu marin karaa waxaana lagugu xukumi karaa dembi – maqnaanshahaagu waxba uma tari doono arrinkaada.

Haddi aad u malaynayso in aad aad u bugto oo aadan imayn karayn maxkamadda

- > Warqad takhtarku kuu qoray oo sheegaysa in aadan 'shaqayn karin' kuguma filna.
- > Waxaa waajib kugu ah inaad keento warbixin buuxda oo uu takhtar caafimaadkaaga ka sameeyey, taasoo sheegaysa in aad aad u bugto oo aadan iman karayn maxkamadda.

Miyaad ku talajirtaa in aad dembiga qiratid?

- > U sheeg looyarkaaga islamarka aad kartid.
- > Haddii aadan looyar lahayn oo aad rabtid in aad dembiga qiratid, u sheeg maxkamadda islamarka aad kartid.

Haddii aad dembiga qiratid marka ugu horraysa ee aad fursad u hesho:

- > Waxaa suurogal ah in *xukun dabacsan* lagugu soo rogo.
- > Kan waxaa laga dhimi karaa qiyaas gaaraysa *saddexdii qayboodba* qayb intii haddii kale lagugu xukumi lahaa.

Haddii aad dembiga inkirto:

- > Adiga ama looyarkaaga ayay maxkamaddu taas sababteeda idin weydiin doontaa.
- > Waxaa dacwaddaada la bilaabi karaa lix toddobaad ka dib, markaa hubaal isugu diyaari.

Haddii aad booliiska ka codsatid inay maxkamadda ka tixgeliyaan dembiyada kale ee aad gashay:

- > Waxaa dhici karta in lagaa ciqaab-mariyo dembiyadaas haddii aad mar dambe dooratid in aadan iyaga qiran goorta aad maxkamadda taagan tahay.

Miyaad weli isleedahay waxan oo dhan muhiim ma aha?

WAAD QALDAN TAHAY.

Arrimaha dib kaliya uma dhigaysid, waad sii xumaynaysaa.

Markaa wax isu tar:

- > Haddii aad dembiga qiran doontid, goor hore samee.
- > Ku eekow shuruudaha damiinashadaada – dhammaantood.
- > Hor imana maxkamadda goorta lagaa raabo.
- > Dacwadda ama dhegeysi kaleba waa loo fadhiisan karaa adigoon joogin haddii aysan maxkamaddu sabab aad u fiican u haysan in aanan sidaas la samayn.

Fadlan ogsoonow:

- > Marka damiinasho lagugu sii daayo adiga ayaa shakhsi ahaan ka masuul ah in aad addeecdo shuruudaha ay kuu dejiyaan booliiska ama maxkamaddu.
- > Booliiska ama maxkamadda keliya ayaa kaa fasaxi kara shuruudahaas.

If you think you are too ill to attend

- > A medical certificate stating that you are 'unfit to work' is not enough.
- > You must provide a full medical report from a doctor, stating that you are too ill to attend court.

Thinking of pleading guilty?

- > Tell your solicitor as soon as you can.
- > If you do not have a solicitor and want to plead guilty, tell the court as soon as you can.

If you plead guilty at the first opportunity:

- > You are likely to get a *reduced sentence*.
- > This could be by as much as *one third* of what you would get otherwise.

If you plead not guilty:

- > The court will ask you or your solicitor the reasons for this.
- > Your trial may start in six weeks, so make sure you are ready.

If you ask the police to have other offences taken into consideration at court:

- > You may be prosecuted for those offences if you later choose not to admit them when in court.

Still think all this doesn't matter?

YOU ARE WRONG.

You are not just delaying things, you are making them worse.

So do yourself a favour:

- > If you are going to plead guilty, do it early.
- > Stick to your bail conditions – all of them.
- > Turn up at court when you are supposed to.
- > The trial or any other hearing could go ahead without you unless the court thinks there is a very good reason not to.

Please note:

- > When you are on bail you are personally responsible for complying with any conditions set by the police or the court.
- > Only the police or the court can release you from these conditions.

This leaflet is available in other formats and languages.
English is printed and other formats are available electronically.
Published by the Office for Criminal Justice Reform, July 2007,
Order code, English only, SYGB/07. Ref: 282563



Criminal Justice System: working together for the public